



Gudniinka gabdhaha iyo dumarka



Funded by
Asylum, Migration and
Integration Fund, AMIF,
of the European Union



MARJAT

Machannuultajien kotoutumisen
edistämisen terveyden ja
hyvinvoinnin keinoin

TURKU AMK
TURKU UNIVERSITY OF
APPLIED SCIENCES



Warbixintan waxaa looga hadlayaa gudniinka gabdhaha iyo dumarka. Gudniinka waxaa loo sameeyay sababo dhaqan. Gudniinka marka la sameynayo waxaa dhaawac loo geystaa unugyada taranka ee bannaanka ku yaal. Gudniinku wuxuu sababi karaa dhibaatooyin badan oo dhinaca caafimaadka ah. ⁽¹⁾

Gudniinku wuxuu Finland la soo galay dadka dalka u soo guuray. Dadka dalka u soo guuray ee jooga Finland waxey sidii hore si ka badan uga soo horjeedaa gudniinka. ⁽²⁾

Sababtee loo guda?

Gudniinka waxaa qiil looga dhigaa sababo la xiriira dhaqan, caadooyin iyo nadaafad. Waxaa la aaminsanyahay in gabadha la guday ay ka nadiifsan tahay tan aan la gudin. ⁽⁴⁾

Dhanka caafimaadkase arrintu sidaas ma ahan. Inta uu socdo dhiigga caadada ayaa waxaa laga yaabaa in uusan dhiiggu gebi ahaanba ka soo wada bixin dumarka. Wuxuu sababaa caabuq. ⁽³⁾

Dhaqamada qaarkood waxaa gudniinka loo arkaa astaanta naagnimada iyo biseyl jinsiyeed. Gudniinka waxaa lagu saaraa xubnaha jirka ee loo arko in ay u muuqdaan nin-nimada. ⁽⁵⁾

Sharciga degsan

Finland waxaa ka jira sharciyo, kuwaas oo qaba in gudniinka yahay dembi. Sida uu sharciga dembiyada qabo, gudniinka waxaa loo arkaa jirdil. ⁽⁷⁾

Heshiiska xuquuqda carruurta ayaa mamnuucaya dhaawicista carruurta iyo jirdilista. ⁽⁸⁾

Dumarku waxey leeyihiin xuquuq ah iney isu taliyaan. Tan waxaa loola jeedaa xuquuqda go'aan ka qaadashada arrimaha iyada quseeya. Gudniinku wuxuu ku xadgudbi karaa xuquuqda isu taliinta. ⁽⁹⁾

Saameynnada dhibaa-tooyinka gudniinka

Saameynnada wakhtiga dheer⁽³⁾:

- xanuun xilliga galmada ah
- dhiigga caadada oo xanuun ah
- madhaleysnimo
- caabuq muddo dheer socda
- dhibaatooyin dhinaca kaadida ah

Saameynnada degdegga ah⁽³⁾:

- xanuun
- dhiig-bax
- shoog
- jabniin lafaha ah
- caabuqyo
- dhimasho

Saameynnada dhibaatooyinka leh ee dhalmada la xiriira⁽²⁾:

- cabsida dhalmada
- dillaac
- xilliga jirashada oo dheer
- caabuqa oo hooyada uga gudba cunugga
- qalliin inta dhalmada lagu jiro
- la socoshada habsami-socodka dhalmada oo adag ⁽³⁾

Qalliinka hagaajinta

Sannadihi la soo dhaafay waxaa la billaabay in la sameeyo qalliinno hagaajin ah. Ujeedoojinka laga leeyahay waa in la wanaajiyo dareenka galmada xaaska.. Sidoo kale ujeedadu waa in la hagaajiyo dhibaa-tooyinka ka dhashay gudniinka. ⁽²⁾ Yoolka qalliinka hagaajintu waa in xubnaha taranka ama galmadu ay u shaqeeyaan si lamid ah sida ay ahaayeen inti aan la gudin kahor. Qalliinka hagaajinta ahi wuxuu sidoo kale soo celinayaa muuqaalka caadiga ah ee xubnaha galmada. ⁽⁶⁾

Adduunyada waxaa ku nool dumar la guday oo 200 milyan ka badan. ⁽²⁾

Dumarka la guday waxey marka boqolleyda lagu xisaaabiyo ku badan yihiin wadamadan:

SOOMAALIYA 98 %
MASAR 87 %
SUUDAAN 87 %
ERITAREYA 83 %

Waxaa intaas dheer in gudniin badan lagu sameeyo wadamo kale oo Afrikaan ah iyo kuwa Bariga Dhexe ah. ⁽²⁾

Ilaaha macluumaadka:

- (1) THL 2016. Gudniinka gabdhaha. www.thl.fi > buug-gacmeedyada > buug-gacmeedka badaadada carruurta > habsami-socodka shaqada > su'aalaha gaarka ah > jirdilista iyo faraxumeyn galmo > gudniinka gabdhaha. Waxaa la soo xigtay 22.01.2018
- (2) Solomie Teshome 15.1.2018
- (3) Wasaaradda sooshalka iyo caafimaadka 2012. Barnaamijka waxqabadka kahortagga gudniinka gabdhaha iyo dumarka 2012-2016 (FGM). Faafinta Wasaaradda sooshalka iyo caafimaadka 2012:8. Fayl pdf ah: Waxaa laga helayaa <http://julkaisut.valtioneuvosto.fi/bitstream/handle/10024/72751/URN:NBN:fi-fe201504226213.pdf>. Waxaa la soo xigtay 22.01.2018.
- (4) Midowga xuquuqul insaanka 2017. Su'aalo iyo jawaabo ku saabsan gudniinka qodban ee xubnaha taranka gabdhaha. Fayl pdf ah: Waxaa laga helayaa: <https://ihmisoikeusliitto.fi/wp-content/uploads/2017/02/Kysymyksi%C3%A4-ja-vastauksia-tytt%C3%B6jen-sukuelinten-silpomisesta.pdf>. Waxaa la soo xigtay 16.01.2018.
- (5) Ururka xuquuqul insaanka 2011. Gudniinka gabdhaha iyo dumarka ee Finland- talos soo jeedinta kooxda khubarada ah ay u soo jeediyeen shaqaalaha sooshalka iyo daryeelka caafimaadka. Fayl pdf ah: Waxaa laga helayaa: https://ihmisoikeusliitto.fi/wp-content/uploads/2014/05/Tyttöjen_ja_naisten_ymparileikkaus_Suomessa_Suositus_sosiaali_ja_terveydenhuollon_henkilostolle_IOL_2011.pdf. Waxaa la soo xigtay 17.01.2018
- (6) De Schrijver, L.; Leye, E. & Merckx, M. 2016. A multidisciplinary approach to clitoral reconstruction after female genital mutilation: the crucial role of counselling. The european journal of contraception & reproductive health care, vol. 21, no. 4, 269–275.
- (7) Sharciga dembiyada 39/1889. Sharcigu wuxuu dhaqangalay 01.09.1995. Saatavissa: <http://www.finlex.fi/fi/laki/ajantasa/1889/18890039001?search%5Btype%5D=pika&search%5Bpika%5D=rikoslaki#L21>.
- (8) Heshiiska caalamiga ah ee QM ee xuquuqda carruurta. Waxaa la soo xigtay 02.04.2018. Fayl pdf ah: Waxaa laga helayaa: https://unicef.studio.crasman.fi/pub/public/pdf/LOS_A5fi.pdf
- (9) Sharciga derajada bukaanka iyo xuquuqdiisa 17.8.1992/785. Sharciga wuxuu dhaqangalay 01.03.1993. Waxaa laga helayaa: <https://www.finlex.fi/fi/laki/ajantasa/1992/19920785>